# SHURUUDAHA SHARCI AHAAN LOOGA BAAHAN YAHAY JOOJINTA OGEYSIINTA ISKA JOOJINTA GURIGA

**Buug-yarahani waa macluumaad sharci ah oo guud. Maaha talo sharci ah oo ku saabsan kiis gaar ah. Haddii ay suurtagal tahay, waa in aad qareen kala hadashaa kiiskaaga gaarka ah.**

Kiisaska iska saarida gurigu waxay ku saleysan yihiin ogeysiinta iska joojinta ijaarka. Ogeysiinta iska joojinta ijaarka waa dokumentiyo qoraal ah oo mulkiile guri siiyo ijaarte si loo dhammeystiro heshiiska ijaarka.

Waxaa jira shuruudo sharci oo kala duwan oo loogu talagalay noocyada kale ee ogeysiinta iska joojinta ijaarka. Haddii mulkiile guri gudbiyo kiiska iska saarida guriga oo ku saleysan ogeysiin oo aanan raacayn sharciga, ijaartuhu wuxuu ku guuleysan karaa kiiska. Xaashidani macluumaadku waxaa ku qoran waxyaabo ah in ogeysiintu noqoto mid sharci ah. Haddii aysan ogeysiin lahayn waxyaabahani, ijaartaha waxaa dhici karta in uu ku guuleysto kiiska maxkamadda.

## Liiska hubinta ee loogu talagalay *dhamaan* ogeysiinta iska joojinta ijaarka:

- Ogeysiinta iska joojinta ijaarka oo kasta waa in lagu bixiyaa **warqad**. Ogeysiinta lagu bixiyo email ahaan, farriin qoraal ah, ama dhanka afku ma aha kuwo sharci ah. Ogeysiinta laguma bixin karo boosto la aqoonsan yahay ama diiwaangashan.
- Ogeysiinta iska joojinta ijaarka oo kasta waa in ay lahaataa **taariikhda iska joojinta ijaarka**. Tani waa inay noqotaa taariikh gaar ah. Ma aha mid ku filan haddii ogeysiin sheegayso "ijaarashada waxaa la joojin doonaa 30 maalmood gudahood" ama wax la mid ah taasi. Waa in ay jirtaa taariikh gaar ah oo ijaartuhu ku guuro.
- Ogeysiinta iska joojinta ijaarka oo kasta waa in ay lahaataa **macluumaad ku saabsan adeegyo loogu talagalay soo halgamayaasha**. Ogeysiintani waxay bixin kartaa macluumaadka la iskala soo xiriirayo oo loogu tagalay mas'uulka adeegyada degaanka ee soo halgamayaasha, ama macluumaad la iskala soo xiriirayo oo loogu talagalay adeega gudbinta, sida 2-1-1.

## Xeerar gaar ah ee loogu talagalay *noocyo gaar ah oo ah* ogeysiinta iska joojinta ijaarka:

Sababta oo ah mulkiilayaasha guryaha oo heshiiska ijaarka u joojin karta sababo kala duwan, xeerarka ogeysiinta iska joojinta ijaarku way kala duwanaan karaan iyada oo ku xiran nooca ogeysiinta.

### Ogeysiinta iska joojinta ijaarka oo ah 10 maalmood, 13 maalmood, ama 72 saacadood ee loogu talagalay talagalay bixin la'aanta lacagta ijaarka:

- Ogeysiinta loogu talagalay bixin la'aanta lacagta ijaarka ee bishii waa in ay ugu yaraan noqdaan 10 ama 13 maalmood. Ogeysiinta 72 saacadood ah waxaa loo oggol yahay oo kaliya ijaarashada toddobaad-toddobaadka ah.
- Waqtiga loo qabtay in lagu bixiyo lacagta ijaarka waa in uu sheegayaa **waqtiga iyo taariikhda** labadoodaba
- Ogeysiintu waa in ay sheegaysaa **qaddar lacageed oo gaar** oo ay tahay in la bixiyo
- Ogeysiintu waxay kaliya uga baahnaan kartaa ijaartaha in uu bixiyo lacagta **ijaarka**, kharash bixinta lala soo daaho, adeegyada 'utilities', ama qaddarka lacageed ee kale

### Ogeysiinta 24 saacadood ah ee loogu talagalay falalka xadka ka baxsan ama dembiyeed:

- Waqtiga loo qabtay waa in uu lahaadaa **waqtiga iyo taariikhda** labadoodaba

- Ogeysiintu waa in ay sheegaysaa **xaqiiqooyin gaar ah**

Ogeysiinta 30 maalmood ah ee loogu tagalay xadgudubyada heshiiska ijaarka:

- Ogeysiintu waa in ay sheegaysaa **xaqiiqooyin gaar ah**
- Ogeysiintu waa in ay sheegaysaa siyaabo **lagu wanaajiyo xadgudubka**

Ogeysiinta 30 maalmood ah ee loogu tagalay sabab mulkiilaha guriga ah:

- Ogeysiintu waa in ay sheegaysaa in mulkiilaha gurigu uu joojinayo heshiiska ijaarka **mid ka mid ah sababahani**:
    - soo afjarida ijaarka
    - ka saarida ijaarka suuqa ijaarka / u beddelida adeeg kale
    - sameynta dayactir ama dib u cusbooneysiin taasi oo ijaarka ka dhigi karto meel aan lagu noolaan karin
    - u soo guurida ijaar/ u soo rarida xubin ka tirsan qoyska ee ijaarka
- mulkiilaha guriga oo ijaarka ka gaday qof kale oo qorsheynaya in uu u soo guuro
- Ogeysiintu waa in ay sheegaysaa xaqiiqooyin gaar ah si loo taageero sababta
- Haddii mulkiilaha gurigu iska leeyahay in ka badan afar guri oo ijaar ah, mulkiilaha gurigu waa in uu diraa ijaarka hal bil oo ay la socoto ogeysiin.

**Xeerar gaar ah ee loogu talagalay ijaartayaasha leh lacag la kabo (guryaha dadweynaha, guryaha dakhligoodu hooseeyo ama foojarada):** Ijaartayaasha dakhligoodu hooseeyo ee bixiya ijaar hoos loo dhigay iyada oo sababtu tahay lacagta dowladdu kabto waxay leeyihiin xeerar gaar ah oo loogu talagalay ogeysiinta iska joojinta ijaarka. Ijaartayaasha haysta foojarka Section 8, ee ku nool guryaha dadweynaha, lacagta canshuurta lagu xisaabiyo ee guryaha, ama guryaha horumarinta reer miyiga, waxay leeyihiin ilaalin dheeraad ah. **Ogeysiinta bixin la'aanta lacagta ijaarka ee loogu talagalay guryaha dakhligoodu hooseeyo waa in ay bixisaa ugu yaraan 10 maalmood si loo bixiyo ka hor joojinta ijaarashada.**

## Maxay sameyn karaan ijaartayaashu haddii ay helaan ogeysiinta iska joojinta ijaarka oo aan sax ahayn?

Haddii ay suurtagal tahay, ijaartayaashu waa in ay la hadlaan qareen. Laakiin haddii ijaarte uusan heli karan qareen, waxaa dhici karta in uu ka guuleysto kiiska maxkamadda ee iska saarida guriga haddii ogeysiinta iska joojinta ijaarku aysan sax ahayn. Si aad u hesho qareen dib u eega ogeysiinta iska joojinta ijaarka, ijaarte waa in uu:

- Yimaadaa maxkamadda la qorsheeyay ee laga soo muuqanayo
- Codsadaa kiiska maxkamadda
- Bixiyaa kharashka gudbinta ama codsadaa in laga dhaafo kharashka
- Jawaab ka gudbiyaa maxkamadda oo sheegaysa in ogeysiinta iska joojinta ijaarku aysan sax ahayn
- Tusaalooyinka: "Ogeysiinta iska joojinta ijaarku ma laha taariikhda iska joojinta ijaarka", ama Ogeysiinta iska joojinta ijaarku ma laha wax macluumaad ah oo ku saabsan adeegyo loogu talagalay soo halgamayaasha"
- Nuqulka Jawaabta boosta ugu soo diraa mulkiilaha guriga ama qareenka mulkiilaha guriga
- Yimaadaa maxkamadda oo qareenka u sheegaa in ogeysiinta aysan sax ahayn

## Khatarta in la tago maxkamadda

Waxaa jirta khatar la xiriirta u qaadida kiiska ee maxkamad.  Waxaa dhici karta in qareenku uusan ku raacsanayn in ogeysiinta iska joojinta ijaarku aysan sax ahayn.     Ama, ay dhici karto in qareenku u arko in aysan aad muhiim u ahayn, haddii mulkiile guri haysto kiis adag oo ah in heshiiska ijaarka lagu xadgudbay.  Ma jiro hab lagu xaqiijiyo in ijaarte uu ku guuleysan doono kiiskiisa.   Haddii ijaartuhu guuldareysto, waa in uu ku guuraa qiyaastii afar maalmood, waxaa dhici karta in uu bixiyo kharashka maxkamadda ee mulkiilaha guriga iyo kharashka qareenka.

Haddii ijaarte codsado maxkamad, oo ka dibna uu beddelo maskaxdiisa, wuxuu guuri karaa ka hor taariikhda kiiska maxkamadda.   Haddii ijaarte guuro ka hor maxkamadda, ka dibna maxkamadda u yimaado dacwad si uu qareenka ugu sheego in uu guuray, qareenku waa in uu buriyaa kiiska.   Si kastaba ha ahaatee, mulkiilayaashu guryuhu waxay weli ka codsan karaan ijaartayaasha in ay lacagta ay ku leeyihiin u siiyaan siyaabo kale, maxkamadda sheegashooyinka yar yar ama la iska qaadida 'collections'.

## Sidee baan u helaa caawimaad dhanka sharciga ah?

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan kiiska maxkamadda ee iska saarida guriga oo go'aankiisa la sugayo, waxaad la xiriiri kartaa Mashruuca Iska difaacida Iska saarida Guriga wixii la xiriira **caawimaada dhanka sharciga ah**.  Mashruuca Iska difaacida Iska saarida Guriga ka wac 888-585-9638, e-mail-ka evictiondefense@oregonlawcenter.org ama booqo https://oregonlawcenter.org/eviction-defense-project/

Wixii macluumaad kale oo sharci ah, waxaad macluumaadka lagala xiriirayo ka heli kartaa xafiiska gargaarka sharciga oo kuu dhow oo ku yaala **https://oregonlawhelp.org/find-legal-help**. Waxaad sidoo kale Adeega Gudbinta Qareenada Gobolka Oregon kala xiriiri kartaa (503) 684-3763.